

# CCS ELEVATE

## BROADLEIGH ELEMENTARY

Bishii Noofeembar 2023, waxaa mahad leh iyada oo ay ugu wacan tahay taageerada baaxadda leh ee codbixiyaasha Columbus, Dugsiyada Magaalada Columbus waxa ay meel mariyeen \$100-milyan oo canshuur ah oo ay ku ballan qaadeen in ay kor ugu qaadaan xarumahooda ayna yarey-nayaan raad-raad-raacooda. Hadafka waa in la taageero hiigsiga degmada ee ah bixinta waxbarasho tayo sare leh ee dhammaan ardayda. Siyaasadda Guddiga (Per Board Policy) 7105, Kormeeraha Guud wuxuu abuuray Guddi Hawleedka Xarumaha Bulshada horaantii Febraayo 2024 si ay u qiimeeyaan dib-u-habeynta xarumaha degmada. Kooxdan hawshani waxay ka kooban yihiin shakhsiyaad leh asal iyo waayo-aragnimo kala duwan.

Guddi-hawleedku waxay u soo jeediyeen talooyinka ugu horreeya ee Guddida Waxbarashada Talaadadii 7-da Maajo. Talooyinku waxay diiradda saareen waxay jaan-goyn doontaa kooxaha muusikada ee dhismayaasha, kor-dhinta galaan-galka tacliimeed iyo wax-qabadyada manhajka ka baxsan, bixinta adeegyo loo siman yahay ee qoysaska iyo ardaydaba, iyo xur-maynta maal-galinta cashuur bixiyaashii hore. Hadafka ayaa ah in si wanaagsan loo fahmo aragtida bulshada ee talooyinka bilowga ah iyo kor u-

qaadida wadashaqeynta iyada oo loo marayo wada hadal furan. Tani waxay gacan ka geysan doontaa in la waafajiyo qorshaha guud ee xarumaha iyo hiigsiga degmada iyo kor u-qaadida fahanka Dugsiyada Magaalada Columbus.

Kooxda Hawl-wadeenada Xarumaha Bulshada ee Kormeeraha Guud waxa ay ku talinayaan in Guddida Waxbarashadu xiro **Dugsiga Hoose ee Broadleigh Elementary School**, kaas oo hadda noqon doona qayb ka mid ah bulshooyinka Eastgate, East Columbus, iyo bulshooyinka Dugsiga Hoose ee Fairmoor Elementary School.

**Dugsiga Hoose ee Broadleigh Elementary School (1952)** wuxuu leeyahay awood uu ugu adeego 400, oo arday; si kastaba ha ahaatee, laga bilaabo sanad-dugsiyeedka 2023-2024, 279 arday oo kaliya ayaa iska diwaan-gelisay, iyada oo heerka adeegsiga hadda uu yahay 69.8%.

Ka soo guurista ardayda Dugsiga Broadleigh una soo rarista saddexdaan dugsi waxay u oggolaanaysaa in ay helaan wax badan oo ah marin u-helka farshaxanka waqti-buuxa, muusikada, iyo macalamiinta jimicsiga jir-dhiska iyo adeegyo badan oo

loogu talagalay Bartayaasha Luuqadda Ingiriisiga iyo ardayda naafada ah. Ardaydani waxay heli doonaan fursad ay ku helaan adeegyadan meel u dhow guriga.

